



## Ardayda Dugsiyada Dadweynaha Portland ayaa Radiyowga OPB wada hadal kaga yeeshay arrinta Jinsiga Barnaamijkiisa "Think Out Loud"

Sidee ayey ardayda iskuulada u arkaan arrinta jinsiga ku saabsan fasalada dhexdooda? Idaacada Dadweynaha ee Oregon(OPB) barnaamijkeeda "Think Out Loud" wuxuu baaris ku saameyey mawduuca isaga oo ka sii daayey idaacada, ka dib markii uu koox ka kooban ardayda Dugsiyada Dadweynaha Portland iyo macalimiinta ka qaaday dood bisha Maarso 13keedii.

Kooxdani waxaa ku jiray ardayda la yiraa Sarah Steele oo fasalka 11naad ee Dugsiya Sarre ee Jefferson iyo Jamie Bikales oo fasalka 12naad ee Dugsiya Sarre ee Linclon, waxaa kale oo ku soo biiray arday ka socda Iskuullka Central Catholic iyo arday kale oo isna ka yimid St. Mary's.

Waxaa sidoo kale ka mid ahaa kooxdaa macalimiinta kala ah Jayme Causey oo ka soda Dugsiya Sarre ee Jefferson, Cesar Ramirez oo ka socda Dugsiya Sarre ee Benson io Courtney Plamer oo ka timid Dugsiya Sarre ee Grant, waxaa kale oo qeyb ka ahayd Angie Morril, madaxa waxbarashada dadka Hindida ah ee Dugsiyada Dadweynaha Portland.

Barnaamijka wuxuu raadiyaha OPB hordhaciisii uga dhigay: Arrinta takoorka jinsiga oo uu ku fiirinayo weyneyso ay dadka oo dhami ay arki karaan si aan hore u dhicin, waxa aan la hadlay ardayda, macalimiinta, iyo kuwa kaleba oo aan kala hadalnay jinsiga iyo aqoonsiga qowmiya qeybta ay ka qaataan waxbarashada- manhajka, doodaha fasalka dhexdiisa, iyo waliba nolol maalmeedka maalin kasta. "Waxa aan soo martiqaadnay dhegeystaan in ay nagala soo qeybgalaan Golaha Madadaalada ee De La Sale North Catholic doodaha dhabta ah ee waayo-aragnimada ardayda ee ku xeeran iskuulka iyo raadinta sidii dariiqyada ay macalimiintu si togan u fudeydin lahaayeen doodahani ku saabsan jinsiga kuwo wax ku ool ah."

Warbaahinta barnaamijku waxa ay socotay muddo ku sima hal saac, laakiin raadiyaha OPB baahinta barnaamijkaasi wuxuu waqti dheeraad ah ayuu ku daray, kaasi oo aad ka dhegeysan karto [shabakada barnaamijka boggaani](#).